



# San Diego Unified School District

EUGENE BRUCKER EDUCATION CENTER  
4100 Normal Street, San Diego, CA 92103-2682

(619) 725-5506

Carl A. Cohn  
Madaxa Waxbarashadda Dugsiyada

Disember 2007

Mudane Waalidiin ama Dadka ardeyda masuulka ka ah,

Sannadka 2007 wuxuu ardeyda dugsiyada San Diego Unified School District u ahaa sannad aad u wanaagsan, taasna mahadeeda idinka ayaa iska leh. Kedib markii uu dabka weyn dhacay ee dugsiyada la xidhay, waxaan mahad ballaadhan u soo jeedineyaa dhammaan dadkii arrintaas caawimaada ka geystay, si ay ardeydeennu nabadgelyo u helaan, waxna u bartaan. Waxaan maalin kasta dhiirigelin wanaagsan ka helaa shaqaalaha dugsiyada, qoysaska waxbarashadda carruurtooda u heellan iyo jaaliyada taageerta waxbarashadda, kuwaas oo mudnaanta koowaad siiyey ardeyda, dhibaato kasta dugsiyadeennu ha la soo gudboonaadaane.

Guddoomiyaha Dawlad-goboleedka Mudane Schwarzenegger wuxuu ku dhawaaqey inay lama huraan tahay in miisaaniyada la dhimo sannadka 2008, inkastoo ay jirto dhibaatooyin xaga dadka guryaha haftada ku bixiya iyo hoos-u-dhac dhaqaale. Sidaas darteed, waa inaan xaqiijinaa in ay ardeydeenna reer San Diego helaan waxbarasho tayo sare leh inkastoo ay miisaaniyadu xadidan tahay –khaasatan qaskii u dabku ku keenay dugsiyadeenna. Sida aad la socotaanba, lacagta ay California ardey kasta ku bixiso wey ka yar tahay marka la barbardhigo lacagaha ay ku bixiyaan dawlad-goboleedyada xaga warashadaha horumarey ee aan tartanka kula jiro, laakiin waa inaysan ardeydeennu noqonin kuwo aan istaahilin wax ay ardeyda dawlad-goboleedyada kale helaan. Sidaas darteed, waa inaan ardeydeenna afhayeenno ama abukaate wanaagsan u noqonaa.

Sida aad la socotaanba, Anigu muddo dhaw ayaan shaqada ka fadhiisaneyaa. Sharaf weyn ayey ii ahayd inaan adiga iyo carruurtaadaba u adeego. Waxaan kale oo sharaf iyaduna ii ahayd inaan ka shaqeeyo nidaamka dugsiyeed ee awooda u leh inuu noqdo kan magaalooyinka waa weyn ee Maraykanka ugu wanaagsan. Labadii sanno ee la soo dhaafay- taageeradiinna darteed- macallimiinteyda iyo shaqaalaha dugsiyadeennu waxay muujiyeen horumar weyn sidii yool wacan loo gaadhi lahaa. Dhammaanteen waxaan og nahay inay carruurteennu wax baran karaan. Dugsiyadeenna guud waxay u heellan yihiin inay ballankaas fuliyaan, sidoo kale waalidiin iyo ardey badan waxay og yihiin inay dugsiyadeennu hab wanaagsan oo horumar leh ku socdaan.

Waxbarashadda ardeyda iyo adeegyada aan qoysaska u fidino wax ka qiimo badan ma jiraan. Waxbarashaddu waa muhim. Noloshu ayey isbeddel ku sameysaa. Albaabada ayey furtaa. Waxyaabaha ugu qiimo badan ee aan ilmaheenna siinaa waa waxbarasho, taas oo uusan qofna ka qaadan karin.

Si Daacadnimo ah,

Carl A. Cohn  
Madaxa Waxbarashadda Dugsiyada

F.G Haddii aad u baxdid inaad suuqa ka soo adeegatid, isla mar ahaantaasna, aad garan weydo wixii aad iibsana lahayd, waxaad xusuusnaataa in buug aad ilmahaaga u soo iibisid uu yahay hadiyada ugu wanaagsan mar kasta.

**Somali version: 12-07 Parent Ltr**